



## Xusuusin sida lagu helo macluumaadka iskuuladda marka jawiga cimiladu xun yahay

Haddii ay cidi ka fikireysay in aan xor ka nahay jawiga cimilada oo xumaado sanad-dugsiyeedka 2017-18, haddaba todobaadkan wuxuu ina xasuusiyey in dabeecada deegaanku ay ku sii soconayo jadwalkeedii. Cimilada todobaadkan oo sababtay in Dugsiyada Dadweynaha Portland hore loo fasaxo labo saacadood ka hor waqtigii caadiga ahaa ee ay awal iskuulada ka bixi jireen ardaydu maalintii Tallaadadii iyo sidoo kale in la baajiyo wax waliba maalintii Arbacada, waxa ay ina xasuusineysaa in ay muhiim tahay in aad lala socdo wixii warar ah ee hadba soo kordha.

Waxa aan leenahay dhowr dariiqo oo qoysasku ay ku heli karaan wararka ay u baahan yihiin, waxaa ka mid ah wixii warar ah cusub ee Khamiista lagu sameeyey daabacadani ka dib intii aan la soo dirin. [Fadlan waxaad fiirisaa sheekooyinkayaga Diisembar](#), marka ay jawiga cimilada noocani ah ay suurtagal tahay inuu yimaado.